



**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASARAADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAH
AGAASINKA ISTAATISTIKADA QARANKA**



Warbixin Bileedka
TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA
Agoosto 2018

Warbixin kooban

Guud ahaan Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bishii Agoosto 2018 wuxuu ahaa 109.09, halka uu ka ahaa 108.94 bishii Julaay 2018.

Isbedelka labada bilood u dhaxeeya ayaa ah sare u kac dhan 0.14% oo ah heerka cabirka Badeecadaha, inkastoo Tusaha Sicirka Badeecadaha ee bishii Julaay uu hoos u dhacay -0.75% ee heerka cabirka Badeecadaha. Qaybaha ugu muhiimsan ee uu qiimahoodu kacay ayaa ahaa Dharka iyo Kabaha oo gaaray +4.85%, Agabka Guryaha (+1.32). sare u kac ku yimid qeybaha dharka caruurta ayaa yimid kadib fasaxa dabaaldegada Eid-al Adha awgeed (Jaantus 2).

Guud ahaan Sicir Bararka 12kii bilood, laga soo bilaabo Julaay 2017 ilaa Julaay 2018 ayaa sare u kacay +3.16% dhibcood ee heerka cabirka sicir bararka Marka labarbar dhigo hoos u dhac ku yimid Sanadkii hore uu ahaa 3.10%.

Shaxda 1: Sicir Bararka Tusaha Sicirka Badeecadaha; Agoosto 2018 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Agoosto 2018	
Tusaha Bishaan (Agoosto)	109.09
Tusaha bishii hore (Julaay)	108.94
Tusaha sanadkii hore bisha Agoosto , (2017)	105.75
Isbedel bileedka % (Julaay iyo Agoosto 2018)	0.14%
Isbedelka Sicir Bararka ee sanadlaha %	3.16%

Sicir bararka ee tusaha sicirka Badeecadaha

Isbedelka boqolleyda ee 12 bilood ee la soo dhaafay

TSB

Tusaha = 100 @ December 2014



Source: Directorate of National Statistics

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) Agoosto 2018

Heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qaybaha TSB, Agoosto 2018

Heerka sicir bararka bishii Agoosto waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Agoosto 2017 ilaa Agoosto 2018.

Dhammaan qaybaha uu ka koobanyahay TSB ayaa sare u kacay 3.16% ee heerka cabirka badeecadaha 12kii bilood ee la soo dhaafay, halkii uu ka ahaa 3.10% bishii Julaay 2017 ilaa Julaay 2018.

Dhammaan qaybaha TSB ayaa sare u kacay bishii Agoosto ee sanadkaan 0.14%.

Dhammaan qaybaha TSB ayaa sare u kacay bishii Agoosto ee sanadkaan 0.14%. marka loo barbardhigo hoos u dhacii bishii Julaay 2018 uu ahaa -0.75%.

Sicir bararka qaybo ka mid ah Badeecadaha, Agoosto 2018.


Sicir bararka qaybaha cuntada iyo cabitaanada caadiga ah, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska cuntada lagu karsado ayaa ah kuwa ugu muhiimsan, uguna miisaanka weyn badeecadaha oo dhan.

Cuntada iyo Cabitaanada caadiga ah ayaa qiimahoodu sare u kacay 0.28%. Natiijo ahaan, sicir bararka sannadka oo kor u kacay 6.07% bishii Agoosto 2018. hoos u dhacaan ku yimid qaybtani waxaa sababay Dalaga oo si wanagsan u soo go'ay. halka sicir bararka Julaay 2017 ilaa Julaay 2018 uu ahaa 5.98%.

Qaybta Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska cuntada lagu karsado ayaa hoos u dhacay bisha Agoosto qiimahooda -1.34%. Sicir bararka qaybtaan 12kii bilood ee la soo dhaafay ayaa hoos u dhacay -2.30 %, halka sicir bararka bishii Julaay 2017 ilaa 2018 uu ahaa 0.44%.

A. Qaybaha ugu waaweyn ee isbedelka sanadlaha (TSB)

Garaaf 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qaybaha; Agoosto 2018 (Dec 2014 = 100)



Qaybaha ugu weyn ee sicir bararku Kordhay (+):


- **Cuntada iyo cabitaanada** caadiga ah ayaa kordhay sicirkoodu 6.47% labo iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay (Agoosto , 2017 ilaa Agoosto 2018). Kororka sicirka ayaa ka dhashay sare u kac ku yimid sicirka Miraha (sida Muuska & Cambaha IWM) (+36.82%), Kaluunka (+17.20%) iyo qudaarta (15.79%).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda kor u kacay 8.54% sanadkan marka loo barbardhigo hoos u dhaca sicirka Sanadkii hore kaasoo gaaray 1.94%. Kor u kacaan ayaa ka dhashay sicirka Dharka caruurta oo gaaray (+24.88%) dabaal daga Ciidul Fitriga dardardar
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** qiimaha looga cunteeyo ayaa hoos u dhacay 5.92% labo iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay marka loo barbar dhigo kororka sicirka bishii Julaay 2017 ilaa Julaay 2018 uu ahaa 5.95%. Kor u kaca sicirka ayaa ka hashay kor u kac ku yimid sicirka maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah. Kororka sicirka ayaa ka dhashay sare u kac ku yimid sicirka maqaayadaha looga cunteeyo oo ahaa (+10.01%).
- **Gaadiidka** ayaa muujiyey hoos u dhac sannadle ah oo dhan 4.23% Bishan Julaay sannadka 2018, marka la barbar dhigo 5.02% oo lagu diiwaan geliyey sanadkii Julaay 2017. Inta badan sare u kacaan ayaa ku yimid naaftada (17.44%) iyo kala iibsiga gawaarida gacanta laabad oo garay 10.06%.

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay (-):

Tubaakada sicirka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay -3.95% bisha Julaay 2018, halka uu sare u kaca ka ahaa 3.70% bishii Julaay 2017. Hoos u dhaca waxaa keenay qiimaha qaadka oo gaaray hoos u dhaciisu (-3.62%) taas oo kuxiran xiliyada roobabka iyo abaaraha. Hoos-u-dhaca wuxuu saameyn ku yeeshay isbedelka caadiga ah ee qiimaha qaadka. Isbedelka bisha ee Tubaakada & Qaadka waxuss si buuxda u xaddidaan dhaqdhaqaaqa dhammaan sare u kaca Qeybaha TSB.

Qaybaha ugu waaweyn ee isbedelka bilaha (TSB)

Chart 2: TSB; Isbedelka Sicir bararka ee bilaha dhamaan qaybaha; Agoosto 2018 (Dec 2014 = 100)



Qaybaha ugu weyn ee Sicir bararka kordhay bisha Agoosto (+):

- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda kor u kacay 4.85% sanadkan marka loo barbardhigo hoos u dhaca sicirka Sanadkii hore kaasoo gaaray -5.86%. Kor u kacaan ayaa ka dhashay sicirka Dharka caruurta oo gaaray (+9.02%)dabaal daga Ciidul Fitriiga awadeed.

Qaybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Agoosto (-):

- Guud ahaan majiraan wax hoos u dhac muhiim ah oo ku yimid sicirkooda bishii Agoosto 2018

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qaybaha badeecadaha ee Agoosto 2018 ee habka COICOP (Dec 2014=100)

Habka kala saarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Agoosto 2017 Tusaha	Julaay 2018 Tusaha	Agoosto 2018 Tusaha	% isbedelka bishaan iyo bishii hore	% Isbedelka bisha sanadkaan iyo bisha sanadkii hore
Dhamaan qaybaha TSB	100.00	105.75	108.94	109.09	0.14	3.16
Cuntada & Cabitaanka caadiga	46.04	107.77	114.42	114.31	0.28	6.47
Tubaakooyinka	1.25	120.18	115.43	115.43	0.00	-3.95
Dharka & Kabaha	5.03	99.96	103.47	108.49	4.85	8.54
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska cuntada lagu kariyo	23.41	105.99	104.96	103.55	-1.34	-2.30
Agabka Guryaha	2.93	100.31	101.69	111.19	1.32	3.98
Caafimaadka	5.00	102.90	99.05	99.05	0.00	-3.75
Gaadiidka	3.77	100.59	104.85	104.85	0.00	4.23
Isgaarsiinta	2.80	94.38	94.33	94.33	0.00	-0.06
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	100.77	101.91	101.91	0.00	1.12
Tacliinta	4.00	100.32	100.40	100.40	0.00	0.07
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	123.70	131.03	131.03	0.00	5.92
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	100.15	103.33	103.33	0.00	3.17

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa isbuuca koowaad iyo kan sedexaad ee bil kasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee kukala yaala afar suuq ee magaalada Muqdisho.